MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

332 Minnesota Street, Ste W1410
First National Bank Building
Saint Paul, Minnesota 55101-2217

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhdd

Nidaamka Ku Xukminta Daawaynta Madaniga ah ee Loogu Talagalay: Dadka Xanuunada Dhimirka Qaba ee Halista ah

1) Baaritaanka Codsiga ka Horeeya iyo Codsiga

A. Qof kasta oo danaynaya ayaa wuxuu dalban karaa degmada inay bilowdo dacwadaha ku xukminta daawaynta. Tani waxay ku bilaabmaysaa baaritaanka codsiga ka horreeya oo ay ku jiraan:
   1. waraysi shaqsiyeed oo lagula yeelanayo; (shaqsi ahaan la doorbidayaa)
   2. baaritaan in lagu sameeyo dabeecadaha la sheegay ee u baahan xukminta daawaynta;
   3. indhaynta fursadaha xaddidnaanta yar ee la qaadan karo halka lagugu xukmin lahaa daawaynta, iyo
   4. soo ururinta macluumaadka dadka kale oo ay ku jiraan baahida daawooyinka iyo rabitaanka ka qaybgalka daawaynta.

B. Wax kasta oo aad u sheegto qofka baaritaanka samaynaya waa lagu dari karaa codsiga sidoo kalena waxaa loo isticmaali karaa dhagaysiga.

C. Kooxda baaritaanka ayaa ku talin doonta in la sii socodsiiyo go'aanka xukminta.

D. Kadib marka la helo talo bixinta, qareenka degmada ayaa go'aan ka gaari doona in codsi loo gudbin doono maxkamada iyo inkale.

E. Baaritaanka codsiga kahor ah looma isticmaali karo dacwadaha kale ee maxkamada.

2) Amarada Haynta ee Maxkamada

A. Maxkamadu waxay soo saari kartaa amarka qabashada iyo haynta si ay kuu dhigto goobta daawaynta haddii:
   1. haddii ay jiro khatar waxyeelo jireed oo daran oo soo gaarta adiga ama dadka kaleba;
   2. haddii aad ku guuldaraystay in u soo xaadirto baaritaan ama dhagaysiga xukminta, ama
   3. waxaad horayba ugu jirtaa haynta amar xaalad degdeg ah.

3) Dhageysiga xukminta

A. Markii ay soo saarayso amarka haynta maxkamadu waa inay ballan u qabato dhagaysiga hordhaca ah 72 saacadood gudahood, oo aysan ku jirin maalmaha dhammaadka asbuuca ama maalmaha feestadu, si loo go'aamiyo haddii aad hadda halis ugu jirto waxyeelo daran oo jireed oo soo gaarta naftaada ama dadka kale.

B. Markii la xareeyo codsi xukminta, maxkamaddu waxay:
   1. Waxay magacaabi dhakhtar ama cilmi-nafsiyaqaan ruqsad haysta si uu kuu baaro, iyo
   2. Waxay magacaabi qareen ku matala.

C. Dhagaysiga xukunka waa in lagu qabto 14 maalmood gudahood marka codsiga la xareeyo. Waa la kordhin karaa sabab wanaagsan oo jirta darteed.

D. Waxaad xaq u leedahay inaad timaado dhagaysiga, inaad markhaati furto oo qareenkaagu yimaado aad keensato oo aad su'aalo weydiiso markhaatiyaasha, iyo in ay maxkamadu u magacowdo baare labaad oo aad doorato adiga iyo qareenkaagu.

E. Warbixinta baaraha waa in la xareeyo ugu yaraan 48 saacadood ka hor dhageysiga aan ka ahayn haddii ay dhinacyada ay heshiis kale isku raacaan mooyee.

Haddii maxkamadu kugu hesho inaad tahay qof qaba xanuunka dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha, waa inay maxkamadu kuu xukunto xarun caafimaad oo ammaan ah haddii aysan jirin goob kale oo daawayn ama barnaamij daawayn oo ay dowladu maamusho oo diyaar u ah inuu ku aqbalo oo awood u leh in ay buuxiyaan shuruudaha baahiyahaaga iyo amniga bulshada labadaba.

4) Marka Lagu Xukumo Kadib

A. Maxkamadu waa inay ku qabato dhagaysiga ugu dambeeya 90 maalmood gudahood laga soo billaabo marka dhagaysiga hore si ay go'aan kama-dambays ah uga gaarto in aad sii tahay qof qaba cudurka dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha (tan waxaa lagu kordhin karaa ilaa hal sano haddii qareenkaaga iyo qareenka degmadu ay tan isku raacaan). Maxkamadu waxaa laga yaabaa in ay go'aamiso inay xukunto oo keliya qofka halis keeni kara sabab cudurka dhimirka dartii ah. Haddii maxkamadu kugu hesho inaad weli qabto xanuunka dhimirka oo aad khatar tahay, xukunkaagu wuxuu noqonayaa muddo aan la cayimin.

B. Haddii aad diidayso daawooyinka (ama aadan awood u lahayn inaad oggolaansho bixiso), maxkamada ayaa laga yaabaa inay qabato dhageysiga dib u eegista daawada si loo eego in aad u baahantahay daawo iyo awoodo in aad ogolaansho bixiso. Haddii maxkamadu dareento inay lagama maarmaan tahay, waxay ku amri kartaa inaad qaadato daawooyinka xitaa haddii aadan rabin.

C. Xukunkaaga ugu dambeeya ee in aad tahay qof qaba cudur dhimirka oo khatar ku ah dadweynaha, kaliya Guddiga Dib ueegista Gaarka ah ayaa dhagaysan kara codsiyada aad ku dalbanaysaan in la beddelo xaaladdaada.

5) Qiimaha Kharashka Daryeelka

A. Haddii lagugu xukumay barnaamijka daawaynta ee dowladu maamusho, waxaa lagugu soo dallaci karaa dhammaan ama qayb ka mid ah kharashka daryeelka. Inta aad nooshahay, tani waxay ahaan doontaa hadba inta aad bixin karto. Dhimashadaada ka dib, gobolku wuxuu xaq u leeyahay inuu xareeyo dacwad ka dhan ah hantidaada oo laga rabo wadarta kharashka.

6) Saamaynta Sharciga ee Xukunka

A. Haysashada hubka:
   1. Qofka lagu xukumay inuu yahay qof kiimikada ku tiirsan ma haysan karo wax hub ah illaa uu si guul leh u dhammaysto daaweynta (eeg MS 624.713 Subd. 1(5)).
   2. Qofka lagu xikmiyey in inuu yahay qof khatar ah sababta oo ah xanuunka dhimirka, korriin ahaan naafonimo leh ama qof qaba cudurka dhimirka oo qatar ku ah dadweynaha waxaa laga yaabaa inuusan haysan karin wax hub ah (eeg MS 624.713 Subd. 1(10)(iv))
   3. Waxaa jira nidaam dib loogu soo ceshado awooda inaad haysato hubka qormada oo ku jirta MS 624.713 Subd. 4. Waxay u ogolaaneysaa qofka lagu xukumay in inuu yahay qof khatar ah sababta oo ah xanuunka dhimirka, kiimiko ku tiirsan ama naafonimada korriinka leh inuu maxkamada ka codsado inay dib u soo celiso awoodiisa haysashada hub. Maxkamadu waxay u baahantahay inay ogaato in qofkaasi aysan u muuqan inuu ku dhaqmo qaab khatar ku ah shacabka isla markaana aysan ka hor imaanaynin danta guud. Maxkamadu waxay tixgelin kartaa caddayn ka timid dhakhtar caafimaad oo ruqsad haysta ama cilmi-nafsiyaqaan caafimaad inaadan weli u sii qabin naafonimadaadii ama, in si guul leh laguu daaweeyay muddo ah saddex sano oo isku xigta ah.

B. Ku xukminta daawaynta qofku inuu yahay qof khatar ah sababta oo ah xanuunka dhimirka, qof qaba cudurka dhimirka oo qatar ku ah dadweynaha, ku tiirsan kiimiko, korriin ahaan naafonimo leh waxay saamayn ku yeelan kartaa rukhsadaha/shattiyada xirfadeed ama shaqsiyeed. Kala xiriir hay'ada ama guddiga bixiya shattigaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

C. Diiwaanka maxkamada ee ku saabsan xukminta madaniga ah waxaa loo tixgeliyaa in ay tahay macluumaad dadweyne. Qaybo ka mid ah faylka waxaa laga yaabaa in la qariyo, laakiin xaqiiqda ah in laguugu xukumay daawayntu waa macluumaad dadwaynaha u furan.

7) Ku Xukminta Daawaynta Madaniga Ah Waxay Leedahay Laba Ujeedo oo Waaweyn

A. Si loo daaweeyo jirradaada marka aadan awoodin ama aadan rabin inaad iskaa daaweyn u raadsato, iyo
B. In laga ilaaliyo adiga iyo/ama dadka kale waxyeellada jirradaada.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 332 Minnesota Street, Ste W1410, First National Bank Building, Saint Paul, Minnesota 55101-2117, https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.